

## Macluumaadka iyo Liiska Tilmaamaha COVID-19 ee Loogu Talagalay Dugsiyada K-12 Iska Ilaalinta COVID-19

Gudoomiye Mike DeWine ayaa xidhay dhammaan dhismayaasha dugsiya ee Ohio, kuwaas oo ay ku jiraan barnaamijyada dugsiya kahor ee ay rukhsada siisay Ohio Department of Education, muddo saddex toddobaad ah oo ka bilaabmay xidhitaanka dugsiya ee maalinta Isniinta, Maarso 16, 2020. Dugsiyada internetka ama koombuyuutarka wax ka bara waa inay sii wadaan shaqooyinkooda sida uu dhigayo jadwalkooda caadiga ahi.

Agaasimaha Ohio Department of Health Amy Acton, M.D., MPH, ayaa si adag ugu tallinaysa in dhamaan dugsiyada K-12 ay si degdeg ah u qaadaan tallaabooyinkan:

- Degmooyinka iyo dugsiyadu waa inay sameeyaan dedaal fiican si ay waxbarashada ugu bixiyaan habab kale inta ay awoodaan una taageeraan sii wadida barashada inta laga maqan yahay dugsiya. Degmooyinka iyo dugsiyadu waxay abuuri karaan qorshayaasha wax ka barashada internetka, oo ay ku jiraan qaababka dijitaalka ah iyo ta masaafada fog. Adeegsiga bacaha dugsiya waxka badan inta caadiyan la oggol yahay ee saddexda cisho ah ayaa la oggol yahay.
- U oggolow shaqaalaha ugu badan ee suurogalka ah inay ku shaqeeyaan guriga adigoo hirgelinaya xeerarka ay kamidka yihiin shaqeynta iyadoo taleefanka la adeegsanayo iyo shirarka fiidiyowga. Maamulka dugsi kastaa waa inuu go'aansadaa xaddiga galitaanka ee munaasibka ah inta uu xidhan yahay.
- Dugsiyadu waxay sii wadi karaan inay taageeraan ardayda iyagoo ku bixinaya quraacda iyo qadada goobaha aanay dadku ku badnayn Dib u eeg [dukumentiga Quraacda iyo Qadada Dugsiya ee](#) Ohio Department of Education si aad u hesho macluumaad dheeri ah oo ku saabsan helitaanka magdhowga cunooyinka la bixiyay intii uu dugsi ugu xidhnaa.
- Degmooyinka waxbarashada siinaya dhammaan ardayda, ee ay kamidka yihiin iyadoo la adeegsanayo qaababka waxbarida ee beddelka ah sida ka barashada onlaynka, barashada masaafada fog, ayaa looga baahan yahay inay ardayda naafada ah siiyaan adeegyada waxbarashada khaaska ah. Haddii ardayga naafada ahi aanuu adeegsan karin qaababka waxbarida ee beddelka ah ee loosoo bandhigay ardayda waxbarashada guud, degmadu waa inay la tashataa waalidka ardayga iyo/ama daryeelayaasha si ay u go'aansadaan baahiyaha ardayga una aqoonsadaan habka ugu haboon ee lagu buuxin karo baahiyahaas inta uu dugsi ugu xidhan yahay.

✓ Dugsiyadu waa inay fursadan uga faa'ideystaan inay dib u eegaan xaalada arday kasta oo ku jira fasalka 12 si ay u go'aansadaan ilaa iyo heerka uu ardaygu buuxiyay [shuruudaha galinjabinta ee fasalka 2020](#). Dugsiyada waxa lagula tallinayaa, in ilaa iyo inta suurogalka ay abuuraan qorshayaal lagu caawinayo arday kasta si uu buuxiyo shuruudahan inta ka hadhsan sannad dugsiyeedka, inta uu dugsi ugu xidhan yahay (hadba sidii macquul ah) iyo marka la furo, labadaba.

✓ Sii wad bixinta macluumaadka si aad shaqaalaha iyo qoysaska ardaydu uga caawiso inay fahmaan COVID-19 iyo tallaabooyinka ay qaadi karaan si ay u ilaalinayaan naftooda. Ka waani ardayda waaweyn iyo shaqaalaha isu imaatinka iyo kulamada bulsheed ee ka qabsooma dhismaha dugsi ama goobaha ka baxsan dugsi, sida guriga saaxiib, makhaayad ama tukaanada.

Wixii macluumaad intaa dheer, booqo: [coronavirus.ohio.gov](http://coronavirus.ohio.gov)


Si aad jawaabo ugu hesho su'aalahaaga COVID-19, wac 1-833-4ASKODH (1-833-427-5634).

*Ilaha dheeraadka ah:*

Ohio Department of Education: Koroona-fayras (COVID-19) Su'aalaha Inta Badan La Weydiyo ee Loogu Talagalay Dugsiyada iyo Degmooyinka Ohio: <http://education.ohio.gov/Topics/Student-Supports/Coronavirus/Frequently-Asked-Questions-Governor-DeWine%e2%80%99s-Scho#FAQ3869>.



JOOG GURIGA  
MARKA AAD  
JIRAN TAHAY




HA TAABAN  
DADKA JIRAN



QAADO HURDO  
KUGU FILAN OO CUN  
CUNTOOYIN ISU-  
DHEELITIRAN



SI JOOGTO GACMAHA  
UGU MAYDH BIYO IYO  
SAABUUN (20  
ILBIRIQSI AMA WAX  
KA BADAN)



KU QALAJI  
GACMAHA TUWAAL  
NADIIF AH AMA  
HAWADA KU QALAJI  
GACMAHAAGA



KU DABOOL  
AFKAAGA SOOFTI  
AMA SUXULKAAGA  
MARKA AAD  
QUFACAYSO AMA  
HINDHISAYSO



HAKU TAABAN  
INDHAHAAGA, SANKAAGA,  
AMA AFKAAGA GACMO  
AAN NADIIF AHAYN AMA  
KADIB MARKA AAD  
TAABATO MEEL



SI JOOGTO AH U  
NADIIFI OO  
JEERMISKA KA DIL  
MEELAHA "INTA  
BADAN LA TAABTO"



WAC KAHOR INTA  
AANAD BOOQAN  
DHAKHTARKAAGA



SAMEE  
DHAQANADA  
NADAAFADA EE  
WANAAGSAN

Wixii macluumaad intaa dheer, booqo: [coronavirus.ohio.gov](http://coronavirus.ohio.gov)